Warbixin loogu tala galay adiga adiga heysta dhalashada wadan kale

Kaalmada bilaawga waxbarasho marka shaqo la’aan jirto

Kaalmada bilaawga waxbarasho waa kaalmo aad heli karto sanad gudahiis haddaad tahay shaqo la’aan una baahan tahay inaad dhigato waxbarasho dugsi sare si aad shaqo u hesho. Waxaad codsaneysaa kaalmada bilaawga waxbarasho ee degmadaada.

Waxbarashooyinka kuu siinaya xaqqa kaalmada bilaawga waxbarasho

Waxbarashooyinka kuu siinaya xaqqa kaalmada bilaawga waxbarasho waa

- waxbarashooyinka ee dugsiga hoose-dhexe iyo heerka gugsiga sare ee waxbarashada dadka waaweeyn (ma ahan SFI, waxbarashada lasoo qaatay, waxbarashada lagu daray tababar)
- koorsooyinka guud ee heerka dugsiga hoose-dhexe iyo dugsiga sare ee iskuulka sare ee dadka.

Maxaa la iska rabaa si loo helo kaalmada bilaawga waxbarasho?

Halkaan waa waxyaalaha la iska rabo ee aad u baahan tahay inaad buuxiso si aad xaq ugu hesho kaalmada bilaawga waxbarashada:

- Waa inaad jirto 25-56 sano (xaqqa kaalmada bilaawga waxbarashada waxa uu ka bilaabanayaa markii aad buuxiso 25 ilaa sanadka aad buuxineyso 56).
- Marki leysku daro ugu yaraan lix bilood oo ka mid ah laba iyo tobanki bilood ee la soo dhaafay ayaad shaqo la’aan ahayd. Haddii aad ku qorneyd barnaamij la xiriira siyaasadda suuqa shaqada ama aad ka qeyb qaadaneysay dadaallo saldhigasho, waxaa sidoo kale laguu arkaa in aad shaqo la’aan tihid.
- Waxaad heysataa waxbarasho hore oo gaaban, waxaadna qabtaa baahi weyn oo ah waxbarasho heerka dugsi hoose-dhexe iyo dugsiga sare si loo helo shaqo. Middaas waxaa go’aaminaya degmada aad degan tahay.
- Ma aadan heesan kaalmo waxbarasho saddaxdii sano ee ugu danbeysay.
- Waxaad waxbaraneysaa ugu yaraan boqolkiiba konton mid ah mid buuxda ugu yaraan saddex usbuuc.

Haddii aad horey u heysatay deyn waxbarasho ma noqon kartid mid ka dib dhacsan bixinta kharashkaas. La xiriir CSN haddaad qabto su’aalo ku saabsan middaas.

Ka akhri wixii faahfaahin ah ee waxa la iska rabo csn.se

CSN nr 2813H/1903/översättning av 2813A-1903

Adiga ah muwaadin wadan kale ah waxaa qasab ah xitaa inaad buuxiso shuruuda si aad xaq u yeelato inaad codsan karto kaalmada waxbarasho ee iswiidhishka ah. Hadaad heysato sharci rasmi ah (PUT) oo aadna degan tahay Iswiidhan, caadi ahaan waxaad xaq u leedahay kaalmada waxbarasho ee iswiidhishka. Waxey khuseeysaa xitaa adiga ka helay sharci ku meel gaar ah hey'adda socdaalka, maadaama laguu aqoonsaday inaad tahay qaxootinnimo ama wax la mid ah. Haddii aadan heysan PUT ama lagula simi karin qaxooti, waxaa jira sharciyo kala duwan oo gaar ah kuna xiran dhalashadaada.

Intee la eg ayaad heli kartaa kaalmada bilaawga waxbarashada?

Ka arag kharashka jira markaas csn.se

Ugu badnaan ahaan waxaad heli kartaa kaalmada bilaawga waxbarashada muddo 50 usbuuc gudahood ah haddii aad wax dhiganeyso boqolkiiba boqol. Haddii aad dhiganeeyso wakhti kala bar ah waxey u dhigantaa 100 usbuuc. Haddii aad heysato daryeelka carruur waxaad heli kartaa kaalmo dheeri ah, taas waxaa loogu yeeraa kaalmada siyaadada ah.

Sideed u codsaneysaa adiga?

Waxaad ka codsaneysaa kaalmada bilaawga waxbarashada degmadaada. Waxey heleyaan sanad walba lacag xoogaa ah ee kaalmada bilaawga waxbarashada. Middaas waxaa maamulaya meeqo ayaa heli karta kaalmada bilaawga waxbarashada. Kama codsan kartid toos CSN.

Sidaan ayey noqoneysaa:

1. La hadal gacan-yarahaaga ee xafiiska shaqada ama degmada si aad u ogaato qofka degmadaada ee kaa caawin kara adiga codsigaada.
2. Degmadaada waxaad ka heleysaa caawin ah inaad qorsheyso waxbarashadaada iyo inaad codsato kaalmada bilaawga waxbarashada. Degmada wuxuu baarayyaa oo uu go'aaminayaa sidoo kale haddii aad ka mid tahay dadka loogu tala galay kaalamda, tusaale ahaan haddii aad horey u heysatay waxbarasho gaaban. Markaas ka dib waxey u dirayaan codsigaada CSN.
3. CSN waxey baareysaa haddii aad buuxineyso shuruudaha kale si aad xaq ugu hesho kaalmada bilaawga waxbarashada ayna kuugu soo dirto go'aan adiga. Adiga ah muwaadin wadan kale waxaad heleysaa labo go'aan- hal waa xaqqaada kaalmada waxbarasho ee iswiidhishka ka muwadaadin ajnabi ahaan iyo mid kale oo ah xaqaada kaalmada bilaawga waxbarasho.

Waxa ay tahay in lagu fikiro inta lagu jiro waxbarashada

Markasta soo sheeg haddii aad xanuunsatid, haddii aad guriga la joogto cunug xanuunsan ama haddii ay wax iska badalaan waxbarashada

- Haddii aad xanuunsatid, waxaad wargelisaa Qasnadda ceymiska. Markaas waxaad si heysan kartaa kaalmada dhaqaale ee waxbarasho isla markaana waxaa hoos dhigaa natiijada lagaa rabo inta ey la egtahay.

CSN nr 2813H/1903/översättning av 2813A-1903

- Haddii aad guriga joogto si aad u xanaaneysid cunug, wargeli CSN. Markaas waxaad xaq u yeelanee manaafacaad la mid ah kuwa marka xanuun jiro.
- Haddii aad iska joojisid koorso ama aad akhrineyso dhibco ka yar kuwa aad qorsheysay, ku wargeli CSN si aan kuugu soo dirno tiro lacag oo sax ah. Haddii kale waxaa lagaa dali karaa inaad dib usoo shubto lacagtaas.
- Waa inaad heysataa dhibcaha ama koorsooyinka leeskaga baahan yahay si aad u hesho lacagta kaalmada ee billaabidda waxbarashada iyo tan kaalmada waxbarashada. CSN waxuu baarayaa natiijada waxbarashadaada markasta oo aad codsi cusub sameyneysid. Uma baahnid inaad lacag dib usoo celiso haddii aadan ku guuleysan inaad keento natiijada waxbarasho ee lagaaga baahnaa.

Maxaa dhacaya marka lagu siiyo lacagta kaalmada ee billaabidda waxbarashada?

Haddii aad rabtid inaad wax sii baratid marka eey dhamaadaan isbuucyada loogu tala galay lacagta kaalmada ee billaabidda waxbarashada, waxaad CSN ka dalban kartaa lacagta waxbarashada. Lacagta waxbarashada waxey ka koobantahay qeyb kaalmo ah iyo qeyb deyn ah. Adiga ayaa dalbanaya haddii aad rabtid qeybta kaalmada oo kaliya ama haddii xattaa aad rabtid inaad lacag deynsatid. Lacagta aad deynsatay waad soo gudeysaa.

Ku saabsan CSN

Hey'adda kaalmaynta waxbarashada (CSN) waa hey’adda maareyso lacagta kaalmada billaabidda waxbarashada ee Iswiidhan. Waxaan kaloo maareynaa lacago kaalmoo kale iyo lacagta deynta ah ee loogu tala galay waxbarashada. Sistamka caawimaadda waxbarashada ee Iswiidhan waxuu ka mid yahay kuwa ugu deeqsiga badan adduunka. Fursadaha helidda dhaqaale waxbarasho ayaa qof kasta oo Iswiidhan ku nool waxuu awoodaa inuu waxbarto, mana ku xirna halka uu deganyahay, dhaqaalaha uu heysto iyo halka uu kasoo jeedo juquraafi ahaan.

Su’aalo ma qabtaa? Bogga csn.se waxaad ka heleysaa jawaabo badan. Waxaad su’aalo weydiinkartaa adigoo u maraya bogga internetka, Facebook ama taleefanka 0771-276 000

CSN nr 2813H/1903/översättning av 2813A-1903

Kaalmada bilaawga waxbarasho

Qawaaniin ku meel gaar ah 2020 sababtoo ah cudurka baahay ee koroona

Intii lagu jiray wakhtiga uu baahay cudurka koroona dad badan ayaa bilaa shaqo noqday. Dawlada iyo baarlamaanku waxay sidaas darteed go'aansaden in la badalo qawaaniinta kaalmada bilaawga waxbarasho inta lagu jiro 2020 si xitaa dadka dhawaan noqday bilaa shaqo ay u awoodaan inay wax ku bartaan kaalmada bilaawga waxbarasho.

Qawaaniintan ku meel gaarha ahi waxay ansax yihiin **laga bilaabo 1 Julaay 2020 till iyo ilaa iyo ay ku jirto 31 Diisambar 2020**. Halkan ayaad ka arkaysaa qawaaniinta ku meel gaarka ah ee 2020:

- Shuruudi shaqo la'aanta waa la badalay si aad adigu u awoodo inaad xaq u yeelato kaalmada bilaawga waxbarasho xitaa haddii aad bilaa shaqo soo ahayd wakhti ka gaaban lix bilood. Tani micnaheedu waa in xitaa adigaaga dhawaan noqday bilaa shaqo aad xaq u yeelan karto kaalmada bilaabida waxbarasho, haddii aad buuxiso shuruudaha kale.
- Xadka lacagta aad shaqo ka helayso waa laga saaray meesha. Tani micnaheedu waa in dakhliyada ku soo gala inta lagu jiro 2020 aanay wax raad ah ku yeelan doonin inta ay leegtahay kaalmada bilaawga waxbarasho ee aad heli karto.

Dhanka csn.se ayaad markasta ka helaysaa macluumaadki ugu dambeeyay ee ku saabsan shuruudaha kaalmada bilaawga waxbarasho.